

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA HANTI
DHOWRAHA GUUD

QORSHAHA
ISTIRAATIJIYADA
2017/20



ARAGTIDA GUUD XHG QORSHAHA ISTIRAATIJIYADA 2017/20



HIIGSIGAYAGA

In aan noqono hay'ad hogaan hantidhowr oo ka jawaab celisa waxtarka iyo kor u qaadista daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka dowliga ah.



HIMILADAYADA

In aan baaris samayno oo aan bixino talooyinl agu wanaajinayo hay'adaha dowladda oo weliba warbixinnada baariseed u dirno Xafiiska Madaxweynaha, Raysal Wasaaraha iyo Baarlamaanka.

YOOLALKA ISTARAATIJIYADA IYO UJEEDOOYINKA

1. WARBIXIN BAARIS SARE WAQTIYEYSAN WAAFAQSANA XEERARKA CAALAMIGA AH

- 1.1 Hagayaasha hantidhowrista ISSAIs ku salaysan ee loogu talagalay baarista ama hubinta hagaagsanaanta (maaliyadeed iyo u hogaansanaanta sharciga) oo loo asteeyay, lana soo saaray lana hirgeliyay
- 1.2 Hagaha hanti dhowrka ama hubinta hawlfulinta oo la asteeyo, la soo saaro lana hirgeliyo
- 1.3 Xoojinta aqoonta SFMIS iyo Awooda baarista ICT
- 1.4 Xaqiijinta Hubinta tayada

3. XOOJINTA XIRIIRADA DIBADDA IYO DANEEYEYAASHA SI LOO HUBIYO IN TALOYINKA HANTI DHOWRKA LA HIRGELIYO OO WARBIXINNADU AY RAAD KU REEBAAN MAAMULKA IYO ISLA XISAABTANKA

- 3.1 Xoojinta xiriirada daneeyeyaasha sida Baarlamaanka, Madaxweynaha, Raysal Wasaaraha iyo Garsoorka
- 3.2 Daabacaadda warbixinnada iyo macluumaadka Hay'adda
- 3.3 Heerka hirgelinta talooyinka hantidhowrka ayaa si cad loogu muujiyaa warbixinta sanadlaha ee hantidhowrka

5. KAABAYAAL IYO AWOOD KU FILAN ICT-DA SI LOO HELO HAWLGALLO HABBOON

- 5.1 Xoojinta Awooda maamulka ICT iyo adeegga taageerada
- 5.2 Qalabka ICT iyo Nidaamyada maamulka macluumaadka ee hagaagsan oo loo isticmaalo dhammaan hawlgallada Hay'adda
- 5.3 Wanaajinta Xarunta iyo qalabka xafiiska Hay'adda

2. XOOJINTA MAAMULKA GUDAHA SI LOO HELO ADEEGYO HANTI DHOWR OO HABBOON WAXTARNA LEH

- 2.1 Dejinta nidaam ka wanaagsan oo lagu qabto qorshaynta guud ee sanadle ah
- 2.2 Xoojinta Hawlfulinta Maamulka
- 2.3 Astaynta, soo saarista iyo hirgelinta nidaamka maaraynta tayada
- 2.4 Isbeddelka xooggan ee maamuleyaasha iyo hab dhismeed urur oo cusub oo XHG laga hirgeliyo
- 2.5 Xoojinta Sumcada gudaha
- 2.6 Wanaajinta xaaladda adeegga iyo Dhiirigelinta shaqaalaha

4. MAAMUL IYO SHAQAALKA XIRFAD IYO AQOON FIICAN LEH

- 4.1 Xoojinta kartida HR
- 4.2 Horumarinta Xirfadaha ee Qorshaha Guud
- 4.3 Hirgelinta barnaamijka Horumarinta Xirfadaha
- 4.4 Taageeridda horumarka xirfadeed ee shaqaalaha Xafiisyada Hantidhowrka ee M/Goboleedyadda

6. BEDDELIDA QAAB SHARCIYEEDKII EE HORE EE XHGUU HADDA KU SHAQEYO

- 6.1 Qaabka sharciyeed ee gabagabaysan oo Madaxweynaha loo diro si uu u ansixiyo
- 6.2 Hirgelinta qaabka sharciyeed

QIIMIGA MUHIIMKA AH



SUMCAD



XAQIIQO EEGIDDA



DAAHFURNAANTA



ISLA XISAABTANKA



SIR ILAALINTA

TUSMADA

i	EREYADA IYO XURUUFKA SOO GAABINTA	ii
1	HORDHAC	1
2	QAAB SHARCIYEEDKA, KAALINTA IYO AWOODAHA HADDA EE XHG	3
	2.1 Qaab Sharciyeedka	3
	2.2 Kaalinta XHG	3
	2.3 Masuuliyadaha	4
	2.4 Masuuliyada Iyo Qaab Dhismeedka Hay'ada	5
	2.5 Falanqaynta Swot Ee XHG	7
3	HIIGSIGA, HIMILADA IYO QIIMIGA XHG	8
4	YOOLKA IYO HIMILOOYINKA ISTIRAATIJIYEED 2017-2020	9
	YOOLKA 1 Warbixin Baaris Sare Waqtiyeysan Waafaqsana Xeerarka Caalamiga Ah	9
	YOOLKA 2 Xoojinta Maamulka Gudaha Si Loo Helo Adeegyo Hanti Dhowr Oo Habboon Waxtarna Leh	11
	YOOLKA 3 Xoojinta Xiriirada Dibadda Iyo Daneeyeyaasha Si Loo Hubiyo In Talooyinka Hanti Dhowrka La Hirgeliyo Oo Warbixinnadu Ay Raad Ku Reebaan Maamulka Iyo Isla Xisaabtanka	13
	YOOLKA 4 Maamul Iyo Shaqaale Xirfad Iyo Aqoon Fiican Leh	14
	YOOLKA 5 Kaabayaal Iyo Awood Ku Filan Ict-Da Si Loo Helo Hawlgallo Habboon	15
	YOOLKA 6 Beddelida Qaab Sharciyeedkii Ee Hore Ee Xhguu Hadda Ku Shaqeeyo	16
5	DABAGALKA IYO QIIMAYNTA QORSHAHA	18
	5.1 Warbixin Sanadley Ah Oo Ku Saabsan Dabagalka Iyo Hawlfulinta	18
	5.2 Qiimayn Dhammaadka Muddada	18

I EREYADA IYO XURUUFTA SOO GAABINTA

AFROSAI-E	Ururka Hay'adaha Hanti dhowrka Sare ee Afrika ee Af Ingiriisi ku hadla
AG	Hanti dhowraha Guud
ARABOSAI	Ururka Carabta ee Hay'adaha Hanti dhowrka Sare
CAAT	Farsamooyinka Hanti dhowrka Kumbiyuutar Lagu caawiyo
DAG	Ku-xigeenka Hanti dhowraha Guud
GC	
E-Governance	Maamulka Elektaroonig ah
HR	Waaxda Shaqaalaha
ICT	Tignoolojiyadda Macluumaadka iyo Isgaarsiinta
IDI	Hindisaha Horumarinta INTOSAI
IMS	Nidaamka Maamulka Macluumaadka
INTOSAI	Ururka Caalami ah ee Hay'adaha Hanti dhowrka Sare
ISSAI	Xeerasha Caalami ah ee Hay'adaha Hanti dhowrka Sare
M&E	Dabagalka iyo Qiimaynta
OAGS	Xafiiska Hanti dhowraha Guud, Soomaaliya
PAC	Guddiga Xisaabtanka Dawli ah
PAM	Buugga Hubinta Hawlfulinta
PC	Kumbiyuutarka Shakhsi ahaaneed
PMF	Qaabka Cabbirka Hawlfulinta
RAM	Buugga Hubinta Hagaagsanaanta
SAI	Hay'adda Hanti dhowrka Sare
SAI PMF	Qaabka Cabbirka Hawlfulinta Hay'adaha Hanti dhowrka Sare
SFMIS	Nidaamka Macluumaadka Maamulka Maaliyadeed ee Soomaaliya
SWOT	Awoodaha, Cilladaha, Fursadaha iyo Halisaha
WB	Bangiga Adduunka



MAXAMED M. CALI

Hantidhowraha Guud ee Qaranka

Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (XHG) wuxuu mas’uul ka yahay hantidhowridda dhammaan hay’adaha dawladda federaalka iyo shirkadaha madax bannaan ee ee dawladda qeyb ku leedahay.

XHG waxaa la aasaasay horraantii 1960nadii. Sanadihii ugu horreeyey, shaqaaluhu way tiro yaraayeen waxaana tayo hooseeyey hawlaha hanti dhowrka. Markii kacaanku yimid sanadkii 1969, XHG waxaa dib loogu habeeyey Garsooraha Xisaabaha (Magistrate of Account) waxaana taas loo adeegsaday sharci cusub (lam. 34 ee 14/04/1972). Waxay tani keentay in dhowr meelood laga wanaajiyo oo natiijooyin la taaban karo laga soo saaro.

Sanadkii 2012, Dastuurka ku meelgaarka ah ee

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa lagu dejiyey mabda’a madax bannaanida ee XHG. Wuxuu mabda’ani weliba ku xusan yahay Qorshaha Horumarinta Qaranka Soomaaliya 2017-19. Cutubka 6.6.2 ee ku saabsan ilaalinta iyo Hantidhowrista guud waxaa ku xusan in tallaabooyin la qaadi doono si loo kordhiyo madax bannaanida iyo kartida Xafiiska Hanti-dhowrka Guud. Hal xeelad oo la sheegay in ujeeddadan lagu gaari karo waxa weeyaan ku lugyeelashada INTOSAI iyo nidaam la iskugu xiro hay’adaha INTOSAI.

“ WE ARE GRATEFUL FOR A
TEAM OF COMMITTED STAFF
AND THE VERY USEFUL
SUPPORT WE CONTINUE TO
RECEIVE FROM OUR VARIOUS
STAKEHOLDERS. ”

Qorshahan Istiraatiijiyeed waxaa ku jira yoolal iyo himilooyin caawin doona in la buuxiyo shardiga Dastuurka ku meelgaarka ah iyo yoolalka u yaalla hanti dhowrka guud ee ku jira Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya 2017-19.

Ujeeddada guud ee Qorshaha Istiraatiijiyadeed waxa weeyaan in sare loo qaado heerka hawlfulinta XHG. Yoolalka iyo himilooyinka qorshaha istiraatiijiyadeed waxay ku salaysan yihiin dib u eegidda caqabadaha hadda ku wajahan XHG.

Waxaa mahadnaq leh kooxda shaqaalaha gudaday xilkooda iyo taageerada waxtarka leh ee aan ka helno

daneeyeyaashayada kala duwan. Waxaan ku kalsoon nahay in hufnaantani ay inaga caawin doonto in aan ka dhabayno aragtidayada isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta maamulka khayraadka dawlaga ah ee dawladda federaalka Soomaaliya.

Guul ka gaaridda guud iyo buuxinta dhammaan yoolalkayaga ku jira Qorshaha Istiraatiijiyadeed waxay u baahan doonaan dadaal adag, hufnaanta iyo daacadnimada maamulka iyo shaqaalaha. Waxaan weliba isku tiirin doonnaa wadashaqaynta iyo taageerada sii socota ee daneeyeyaashayada, gaar ahaan Madaxweynaha, golaha fulinta iyo baarlamaanka.

Mabaadii'da Muhiimka ah ee Madax-bannaanida SAI

1. Jiritaanka qaab dastuur/qaanuun/sharci habboon waxtarna leh iyo adeegyada hirgelinta dhabta ah
2. Madaxbannaanida hay'addaiyo xubnaha hay'addaha la wadaaga, sidaXeer ilaalinta guud, hay'adaha nabadgelyada waqtiga ay si caadi ah hawlahooda u fulinayaan
3. Is xilsaar ku filan iyo ikhtiyaar buuxa, marka shaqooyinka Hay'adda la fulinayo
4. Xad la'aanta macluumaadka la heli karo
5. Xuquuqda iyo waajibaadka in ay shaqadooda ka warbixiyaan
6. Xorriyad ay u helaan in ay ka go'aan gaaraan waxa ku jira warbixinnada hanti dhowrka iyo waqtigooda iyo in ay daabacaan ayna faafiyaan
7. Jiritaanka nidaamyo waxtar leh oo lagula socdo talooyinka hay'adda
8. Xorriyadda maaliyadeed iyo maamulka/xukunka iyo diyaarsanaanta khayraadka hagaagsan ee dad, qalab iyo dhaqaale ahba

SAI 10 Shaacinta Mexico ee ku saabsan Madaxbannaanida HAY'ADDA

(http://www.issai.org/en_us/site-issai/issai-framework/2-prerequisites-for-the-functioning-of-sais.htm)

QAAB SHARCIYEEDKA, KAALINTA IYO AWOODAHA HADDA EE XHG



2.1 QAAB SHARCIYEEDKA

Waxqabadka XHG wuxuu ku salaysan yahay Nidaamka Maamulka Maaliyadeed ee dawladda. Waqtigan la joogo, waxaa ka mid ah shuruucdan hoos ku xusan:

- 1. Sharci L. 2 ee 29/12/1961, Nidaamka Xisaabaadka iyo Maaliyada qaranka
- 2. Sharci L. 317 ee 17/12/1962, Shuruucda Xisaabaadka qaranka
- 3. Sharci L. 318 ee 18/12/1962, Shuruucda Kaydadka
- 4. Sharci L. 34 ee 14/04/1972, Sharciga Xafiiska Hanti Dhawrka Guud

2.2 KAALINTA XHG

Nidaamka maamulka Soomaaliya, waxaa isku barbar socda masuuliyadda iyo isla xisaabtanka. Marka la raaco Shuruucda u taalla Xisaabaha qaranka, Maamulka sare ayaa soo uruuriya, bixiya oo maamula lacagaha dawladda. Hay'ad kastoo dawli ah waxaa waajib ka saaran yahay dadweynaha iyo canshuur bixiyeyaasha, marka loo eego sida ay u fuliso shaqooyinkeeda.

Wixii khuseeya maamulka iyo xukunka Dhaqaalaha Dawladda, waxaa door ahmiyad badan ku leh Baarlamaanka Qaranka ee Soomaaliya. Soo uruurinta iyo kharash gareynta lacagaha dawladda ee ay samayso

Dawladda Soomaaliya waxay ku xiran yihiin ogolaanshaha iyo dabagalka Baarlamaanka.

Marka ay kharash gareynayaan lacagaha dawladda, waxaa Maamulka sare laga sugayaa in ay ballanqaad adag bixiyaan oo ay si adag u xukumaan kharashka ayna habboonaanta iyo dhaqaalaha u ilaaliyaan hawlgalladooda taasoo raacsan ujeedooyinka Baarlamaanka. Waxaa weliba laga sugayaa in ay diyaariyaan xisaabo iyo bayaanno maaliyadeed oo faahfaahsan.

Waxaa kuwan hubinaya ama hanti dhowr ku samaynaya Hanti dhowraha Guud oo waqtiyada warbixinnada hanti dhowrka loogu gudbiyo Baarlamaanku waxay ku qeexan yihiin nidaamka Maaliyadeed iyo Xisaab haynta ee qaranka. Wareegga isla xisaabtanku waxuu ku dhammaadaa Baarlamaanka iyadoo dib loo eego Xisaabaha Dowladda iyo Warbixinnada Hanti dhowraha Guud, waxaana sidaas sameeya Guddiyada Baarlamaanka ee kormeeridda isla xisaabtanka, oo ah Guddiga Maaliyada Baarlamaanka (PAC).

Qaabka isla xisaabtanka waxtar leh waxuu caawiyaa in la hubiyo in lacagaha iyo khayraadka dowladda lagu maamulo hab sharci ah, awood xirfadeed leh, waxtar leh oo habboon iyo in la gaaro himilooyinka barnaamijyada dowladda. Xafiiska Hanti dhowraha Guud waxuu qayb daruuri ah ku leeyahay qaabka guud ee isla xisaabtanka iyo maamulka.

Sida Dastuurka waafaqsan, Hanti dhowraha Guud waa in uu sameeyo hawlaha hanti dhowrka, iyo

baaritaanno lagu qiimeeyo habboonaanta, waxtarka, iyo isla xisaabtanka hay'adaha waaxda dawladda iyo barnaamijyadooda. Kordhinta iyo xoojinta isla xisaabtanka ayaa himilada dhexe u ah hanti dhowrka XHG uu ku sameeyo kharashyada dowladda.

Warbixinnada hanti dhowrka ee ku saabsan hawlfulinta dawladda ayaa fursad u siiya Baarlamaanka, shaqaalaha dowladda, maalgashadeyaasha, hoggaamiyeyaasha ganacsatada, kooxaha muwaadiniinta, warbaahinta, hay'adaha horumarinta, indheergaradka iyo daneeyeyaasha kale in ay ogaadaan sida loo kharash gareeyo lacagaha dowladda iyo in ay qiimeeyaan tayada xukunka dowladda.

Waxay tani suurtoogelinaysaa in dadweynuhu baaro hawlgallada Dowladda waxayna cadaadis saaraysaa shaqaalaha dowladda ee daacad ah waxsoosaarna leh waxayna suurtoogelinaysaa nidaam maamul oo isla xisaabtan leh oo loogu baahan yahay adeeg fulinta habboon.

2.3 MASUULIYADAHA

Sida uu dhigayo sharciga hanti dhowrka ee hadda (sharci Lam. 34 ee 14/04/ 1972), XHG waxuu mas'uul ka yahay hubinta ama hanti dhowr ku samaynta dhammaan dakhliyada iyo kharashyada, mashaariicda raasumaal leh, qandaraasyada deeqaha iyo hantida (hantida guurta

iyo ma guurtada ah ee qaranka). Qodobka 5aad waxuu dhigayaa in Xafiiska Hanti dhowraha Guud uu sameeyo baarista hore ee maamulka oo la sameeyo ka hor inta aanan kharashyada la bixinin waxaana ka mid ah:



Diiwaangelinta amarka miisaaniyadda



Diiwaangelinta Dalabka qandaraaska



Diiwaangelinta Qandaraasyada Maaliyadeed



Diiwaangelinta dikareetooyinka



Diiwaangelinta dallacaadyada



Diiwaangelinta xuquuqda



Diiwaangelinta kala wareejinta miisaaniyadda iyo




La socodka dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee khasnada dhexe ee dowladda dhanka Dakhliga iyo Kharashyada

XHG waxaa laga filayaa in uu sameeyo Baarista dambe oo la qabto ka dib marka kharashyada la galo, si loo hubiyo qoondada miisaaniyada iyo mashaariicda horumarineed.

XHG waxuu sameeyaawarbixinta Sanadle ah (bayaannada maaliyadeed) ee Wasaaradda Maaliyadda ka hor inta aanan loo dirin Baarlamaanka iyo Madaxweynaha.

2.4 MASUULIYADA IYO QAAB DHISMEEDEKA HAY'ADA



2.4.1 Lataliyaha Guud

- Kala taliyo Hanti dhowraha Guud dhammaan arrimaha la xariira sharciyada
- Diiwaangeliyaa heshiiska maaliyadeed ee Dowladdu gasho
- Diiwaangeliyaa dalabyada qandaraasyada nidaamyada iibka qaranka
- Diiwaangeliya dikreetooyinka
- Diiwaangeliyaa xaqiinta iyo hawlgabka
- Diiwaangeliya nidaamyada iyo shuruucda laga soo saaro baarlamaanka

2.4.2 Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda

- Maareeyaa waxqabadyada maamulka iyo maaliyadda ee XHG
- Dejiyaa miisaaniyadda XHG lana socdaa in miisaaniyadda si hagaagsan loo isticmaalo looguna dhaqmo
- Waxay qabataa hawlaha iibka ee XHG. Waxay bixisaa waxqabadyada maamulka tas-hiilaadka
- Maamushaa oo fayl gelisaa dukumeentiyada xusuus dhawrka

2.4.3 Waaxda Shaqaalaha

- Horumariyaa xirfadaha shaqaalaha iyo Jihaynta
- Maamulidda shaqo siinta shaqaalaha XHG
- Maamulka hawlfuulinta iyo nidaam wanaajinta
- Wanaajinta dallacaadda, dhiirigelinta iyo xaaladaha shaqada (awoodaha xirfadeed)

2.4.4 Waaxda Dowladda Dhexe

- Hirgelinta baarista iyo warbixinnada
- Dib u eegista warbixinnada qabyada ah iyada oo lagu salaynayo cadeymaha iyo tayada

2.4.5 Waaxda Xiriirka M/Goboleedyada

- Hormarinta xiriirka Maamul goboleedyada
- Awood siinta Maamul goboleedyada
- Dib u eegista tayada warbixinnada

2.4.6 Waaxda Dowladda Hoose

- Baarista dakhliga iyo kharashyada dowladda hoose
- Ilaalinta warbixinada maaliyadeed ee dowladda hoose
- Adeegsiga Hirgelinta Xeerarka Tayo Hubinta iyo Tayo Maaraynta
- In dib u eegis lagu sameeyo tayada warbixinada

2.4.7 Waaxda khasnada Dhexe ee Dowladda

- Raad raaca dhammaan dakhliga iyo kharashyada ka yimaadda dowladda dhexe, maamul goboleedyada iyo D/hoose
- Iswaafajinta dhaqdhaqaaqa Bangiga Qabtaa xisaab xirka maaliyadeed ee bilaha iyo sanadlaha
- Diiwaangeliyaa dhaqdhaqaaqa dhaqaale ee bangiga dhexe

2.4.8 Waaxda ICT


- Hagaajinta waxqabadyada IT ee XHG
- Hormarinta agabka IT
- Hagaajinta xiriirka isgaarsiinta
- Hagaajiya faylalka elektaroonig ah

2.4.9 Waaxda Qorshaynta iyo Hawlfuulinta Guud

- Wuxuu kala shaqeeyaa Hantidhowraha iyo maamulka sarre qorshaynta khayraadka XHG
- Maareeyaa qorshaha istiraatiijiyadda iyo hawlgalka
- Wuxuu kaalin muhiim ah ka qaataa horumarinta iyo awood siinta XHG. Wuxuu ka shaqeeyaa dejinta siyaasadaha iyo xeerarka

2.5 FALANQAYNTA SWOT EE XHG

Falanqaynta Awoodaha, Ciladaha, Fursadaha iyo Halista (SWOT) waxaa lagu eegaa waxyaabaha isbeddelka keena iyo caqabadaha XHG dhanka gudaha iyo dhanka dibaddaba. Arrimaha guduhu waa Awoodaha iyo Cilladaha, halka dhinaca dibadda lagu ogaado Fursadaha iyo Halisaha:



Awoodaha	Ciladaha
<ul style="list-style-type: none"> - U hogaansamida sharciga baarista Hay'addaha dowladda - Awoodaha baarista maaliyadeed - Xiriirka Baarlamaanka - Qaabka baarista mashaariicda hay'addaha dowladda 	<ul style="list-style-type: none"> - Shaqaalaha oo xirfad iyo karti ahaan u hagaagsaneyn - Faham la'aanta qiimaynta baarista - Xadidnaanta tignooloojiyadda
Fursadaha	Halisaha
<ul style="list-style-type: none"> - Taageerada awood siinta laga heli karo IDI iyo urur goboleedyada kale - Nidaaminta hay'adaha dowladda iyo qaabeynta Miisaaniyadda - Waqtiyenta howlaha qaabeynta miisaaniyadda - Xubinimada AFROSAI-E iyo ARABOSAI - Ogolaashiyaha baarista hay'adaha dowladda 	<ul style="list-style-type: none"> - Nidaamka isla xisaabtanka liita ee hay'adaha dowladda - Bay'ada hawl socodsiinta ee liidata


3 HIIGSIGA, HIMILADA IYO QIIMIGA XHG



In aan noqono hay'ad hogaan hantidhowr oo ka jawaab celisa waxtarka iyo kor u qaadista daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka dowliga ah.



In aan baaris samayno oo aan bixino talooyinl agu wanaajinayo hay'adaha dowladda oo weliba warbixinnada baariseed u dirno Xafiiska Madaxweynaha, Raysal Wasaaraha iyo Baarlamaanka.



Sumcad

In aan waajibaadkayaga ku gudanno daacadnimo buuxda iyo karti xirfadeed.



Sir ilaalinta

In aan sirta gebi ahaan u ilaalinno dhammaan arrimaha khuseeya lana xiriira Hanti dhowrka.



Xaqiiqo eegidda

In aan diyaarinno warbixinno baariseed iyo natiijooyin xaqiiqada lagu eego oo aanan eexasho lahayn.



Daahfurnaanta

In aan daahfurnaano iyo isla xisaabtan ka muujinno hawlfulinta iyo isticmaalka hagaagsan ee khayraadka maaliyadeed annagoo sanad walba soo saarna warbixinta hawlfulinta iyo isla xisaabtanka.



Isla xisaabtanka

In aan soo saarno warbixinno iyo fikrado baariseed ku saabsan oo gebigood sax ah.

YOOLALKA IYO HIMILOOYINKA ISTIRAATIJIYEED 2017-2020

1

WARBIXIN BAARIS SARE WAQTIYEYSAN WAAFAQSANA XEERARKA CAALAMIGA AH

Tuseyaasha yool gaarista:

- Warbixin baaris sare waqtiyeysan waafaqsana xeerarka caalamiga ah
- Tirada baarista la dhameestiray lagana warbixiyey iyadoo la isticmaalay hagayaasha cusub ee XHG
- Tusiya WB ee mashruuca PFM: Waqtiga u dhexeeya (bilo ahaan) dhammaadka muddada laga hadlayo iyo marka Baarlamaanka loo gudbiyo warbixinnada hanti dhowrka
- Tusiyaasha PMF ee SAI-9 ilaa SAI-17: Xeerarka, nidaamka iyo u hogaansanananta, hawl fulinta iyo natiijoyinka baarista maaliyadeed

HIMILADA 1.1 - HAGAYAASHA HANTIDHOWRISTA ISSAIS KU SALAYSAN EE LOOGU TALAGALAY BAARISTA AMA HUBINTA HAGAAGSANAANTA (MAALIYADEED IYO U HOGAANSANAANTA SHARCIGA) OO LOO ASTEYAY, LANA SOO SAARAY LANA HIRGELIYAY

Waxqabadyada muhiimka ah:

- In la asteeyo lana turjumo hagayaasha sida AFROSAI-E
- Tababbarka baarayaal laga soo doorto XHG si ay u sameeyaan hanti dhowris tijaabo ah ka dibna tababar siiyaan shaqaalaha kale ee XHG
- Hagista hey'adaha gobolka iyo shaqo ku tababarida ee lagu bixiyo hawlo la soo doorto oo ka mid ah meertada baariseed. Tababarka hanti dhowreyaasha dhammaantood iyadoo la isticmaalayo waayo aragnimada laga helo khubarada hanti dhowrada
- Qabashada baaris dhameestiran ayadoo la isticmaalayo hagayaasha cusub
- Ka qayb qaadashada shirarka iyo tababaradda ee AFROSAI-E

Waxsoosaarka la filayo:

- Hagaha XHG ee lagu qabto baarista hagaagsan sida waraaqaha lagu shaqeeyo oo af Soomaali ku qoran
- Warbixinnada hanti dhowrka ee ku salaysan habka uu hagaha cusub dhigayo
- Hanti dhowreyaasha iyo maamuleyaasha oo loo tababaro habka uu hagaha cusub dhigayo

HIMILADA 1.2 - HAGAHA HANTI DHOWRKA AMA HUBINTA HAWLFULINTA OO LA ASTEEYO, LA SOO SAARO LANA HIRGELIYO

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Asteynta iyo turjumida waraaqaha hawl fulinta hagaha baarista ee AFROSAI-E iyadoo lagu siinayo tababar maamulka
- Tababarka qaar ka mid ah shaqaalaha hantidhowrka lana siiyo shaqo ku tababarid si ay u tababaraan shaqaalaha kale ee xafiiska
- Hagista hantidhowrka gobolka iyo tababarka shaqada lagu qaato ee laga bixiyo hawlo la soo doorto oo ka mid ah wareegga hanti dhowrka
- Tababbarka hanti dhowreyaasha dhammaantood iyadoo la isticmaalayo waayo aragnimada laga helo hanti dhowris tijaabo ah
- Hawlaha maaraynta hanti dhowrka hawlfulinta dhammaantood ku qabo RAM
- Ka qayb qaadashada cusboonaysiinta farsameed ee AFROSAI-E iyo tababbarada kalee PAM ee habboon

Waxsoosaarka la filayo:

- Hagista Hantidhowrka Hawlfulinta ee XHG sida waraaqaha lagu shaqeeyo ee tusaale ah oo af Soomaali ku qoran
- Warbixinnada hanti dhowrka ee hagaha hawl fulinta loo isticmaalo
- Hanti dhowreyaasha iyo maamuleyaasha oo loo tababbaro habka hagista hawl fulinta

HIMILADA 1.3 - XOOJINTA AQOONTA SFMIS IYO AWOODA BAARISTA ICT

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- In baarayaasha la siiyo tababar ku saabsan dhanka IT iyo SFMISka
- Asteynta iyo turjimada hagaha teknoolejijiyada
- Qabashada baarista halisaha teknoolejijiyada iyadoo la siinayo shaqo ku tababarasho dhanka meertada baarista

Waxsoosaarka la filayo:

- In la turjumo hagaha teknooleiga
- In la sameeyo warbixinta halisaha baariseed ee teknoolejijiyada kuna salaysan hagaha baarista tiknoolijiyada
- Hantidhowreyaasha oo loo tababbaro tiknoolijiyada

HIMILADA 1.4 - XAQIJIJINTA HUBINTA TAYADA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- In lagu martiqaado AFROSAI-E ama hay'addaha caalamiga ah ee la aqoonsanyahay si ay u qabtaan xaqiijinta tayada baariseed ee ay ka mid tahay hubinta hagaagsanaanta iyo hawl fulinta baariseed kuna salaysan nidaam
- In la sameeyo qorshe lagu wanaajiyo kuna salaysan dib u eegista hubinta tayada

Waxsoosaarka la filayo:

- Hubinta warbixino tayo leh ayna la socdaan talooyin
- Qorshaha wax lagu wanaajinayo

2

XOOJINTA MAAMULKA GUDAHA SI LOO HELO ADEEGYO HANTI DHOWR OO HABBOON WAXTARNA LEH

Tuseyaasha yool gaarista:

- Jawaab celinta gudiga maaliyada baarlamaanka ee warbixinta sanad laha ah ee hantidhowrka
- Qiyaasta boqolley ah ee laga hirgeliyo talooyinka hanti dhowrka
- Tuseyaasha SAI 24 ee xiriirka lala samaynayo baarlamaanka, golaha fulinta, garsoorka iyo SAI 25 xiriirka lala samaynayo warbaahinta ururada bulshada rayidka iyo muwaadiniinta

HIMILADA 2.1 - DEJINTA NIDAAM KA WANAAGSAN OO LAGU QABTO QORSHAYNTA GUUD EE SANADLE AH

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Horumarinta nidaamka qorshaynta guud ee sanadlaha ah ee hanti dhowrka oo lagu xiro hagayaasha lagu qabto baarista
- Tababarka qorsheynta guud ee baarista sanadlaha ah
- Hirgelinta qorshe sanadeedka sida shaqo ku tababarashada

Waxsoosaarka la filayo:

- Waraaqaha iyo hagayaasha ee qorshaha guud ee baarista sanadlaha ah ee saddexda sano ee soo socota
- Qorshaha guud ee sanadle ah ee hanti dhowrka ee saddexda sano ee soo socda
- Qabashada kulanka qorshaynta sanadlaha ah ee hantidhowrka ee loogu talagalay maamulka federaalka iyo Dowlad Goboleedyada (hantidhawraha guud, ku xigeenada, agaasimiyaasha iyo hantidhawrayaasha sare)

HIMILADA 2.2 - XOOJINTA HAWLFULINTA MAAMULKA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Dhisidda iyo hirgelinta qorshooyinka sanadlaha ah ee hawl fulinta lana xiriirta qorshaha istiraatiijiyadeed
- Diyaarinta warbixinnada gudaha iyo Hawlfulinta hay'adda
- Koorsooyinka tababaridda maamulka ee loo asteeyey hantidhawrada gobolka

Waxsoosaarka la filayo:

- Qorshe sanadeed
- Warbixinnada joogto ah ee gudaha
- Warbixinta Hawl fulinta hay'adda

HIMILADA 2.3 - ASTAYNTA, SOO SAARISTA IYO HIRGELINTA NIDAAMKA MAARAYNTA TAYADA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Asteynta iyo turjumida nidaamka tayada lagu maareeyo taasoo qayb ka ah asteynta hagista baarista iyada oo ay qayb ka yihiin masuuliyiinta sare
- In loo tababaro maamulka hubinta tayada baarista taasoo qayb ka ah tababarada hagayaasha baarista

- Liisaska warbixineed ee maaraynta tayada oo lagu hirgeliyo baarista tijaabada ah laguna daro hagista tababarada hay'ad goboleedyada ee shaqa ku tababarashada
- Dhammaan baarayaashu waa in ay isticmaalaan Liisaska hubinta tayada baarista

Waxsoosaarka la filayo:

- Liisaska hubinta tayadu waa in ay ku qornaadaan af Soomaali
- Dhammaan maamulka waa in loo kordhiyo xirfadaha maaraynta tayada

HIMILADA 2.4 - ISBEDDELKA XOOGGAN EE MAAMULEYAASHA IYO HAB DHISMEED URUR OO CUSUB OO XHG LAGA HIRGELIYO

Waxqabadyada muhiimka ah:

- Hubinta in shaqaalaha lagu wargeliyo lagana qayb geliyo isbeddellada hay'adda iyadoo la adeegsanayo kulanada joogtada ah ee shaqaalaha
- Horumarinta qaab dhismeedka cusub ee hay'adda lana xiriira tilmaamaha cusub ee shaqada
- Hirgelinta qaab dhismeedka cusub ee hay'adda

Waxsoosaarka la filayo:

- Qaab dhismeedka cusub ee hay'adda
- Shaqaalaha oo la socda kuna qanacsan isbeddellada hay'adda

HIMILADA 2.5 - XOOJINTA SUMCADA GUDAHA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Xafiiska oo gebi ahaan loo dejiyo Xeerka anshaxa, oo ku xiran hagayaasha cusub ee baarista lagu qabto
- Dhammaan Shaqaalaha oo loo tababaro laguna wacyi geliyo Xeerka anshaxa

Waxsoosaarka la filayo:

- Xeerka anshaxa xafiiska oo lagu dhaqmo
- Bayaanka anshaxa oo noqda warqad qoran oo lagu shaqeeyo loona adeegsado baaris kasta

HIMILADA 2.6 - WANAAJINTA XAALADDA ADEEGGA IYO DHIIRIGELINTA SHAQAALAHA

Waxqabadyada muhiimka ah:

- Diyaarinta qorshe lagu kordhiyo mushaarrada iyo gunnooyinka shaqaalaha XHG lana siiyo gunno haliseed
- In talo laga weydiiyo hantidhowrada kale waxyaabaha beddel noqon kara iyo sida loo wanaajiyo xaaladda adeegga iyo dhiirigelinta shaqaalaha XHG
- Doonista maalgelinta iyo hirgelinta wanaajinta xaaladda adeegga iyo dhiirigelinta

Waxsoosaarka la filayo:

- Shaqaale niyadsan oo aan laaluush aqbaleynin
- Wanaajinta nidaamka dhiirigelinta shaqaalaha

3

XOOJINTA XIRIIRADA DIBADDA IYO DANEEYEYAASHA SI LOO HUBIYO IN TALOYINKA HANTI DHOWRKA LA HIRGELIYO OO WARBIXINNADU AY RAAD KU REEBAN MAAMULKA IYO ISLA XISAABTANKA

Tuseyaasha yool gaarista:

- Jawaab celinta gudiga maaliyada baarlamaanka ee warbixinta sanad laha ah ee hantidhowrka
- Qiyaasta boqolley ah ee laga hirgeliyo talooyinka hanti dhowrka
- Tuseyaasha SAI 24 ee xiriirka lala samaynayo baarlamaanka, golaha fulinta, garsoorka iyo SAI 25 xiriirka lala samaynayo warbaahinta ururada bulshada rayidka iyo muwaadiniinta

HIMILADA 3.1 - XOOJINTA XIRIIRADA DANEEYEYAASHA SIDA BAARLAMAANKA, MADAXWEYNAHA, RAYSAL WASAARAHA IYO GARSOORKA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Dejinta nidaamka xiriirka qorshaha
- Kulan sanadlaha ah ee gudiga maaliyada baarlamaanka
- Qabashada kulan lala yeesho daneeyayaasha

Waxsoosaarka la filayo:

- Diyaarinta barnaamijka wargelinta daneeyayaasha
- Daneeyayaasha muhiimka ah oo loo dareen geliyo kaalinta XHG

HIMILADA 3.2 - DAABACAADDA WARBIXINNADA IYO MACLUUMAADKA HAY'ADDA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Wanaajinta iyo isticmaalka bogga internetka
- Ku faafinta baraha bulshada

Waxsoosaarka la filayo:

- Warbixinta sanadlaha ah ee hanti dhowrka oo lagu daabaco bogga internetka
- Macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan waajibaadka iyo hawlgallada hay'adda oo lagu daabaco bogga internetka

HIMILADA 3.3 - HEERKA HIRGELINTA TALOYINKA HANTIDHOWRKA AYAA SI CAD LOOGU MUUJIYAA WARBIXINTA SANADLAHA EE HANTIDHOWRKA

Waxqabadyada muhiimka ah:

- Natiijooyinka warbixinta ee khuseeya dabagalka baarista hore oo lagu daro warbixin sanadeedka ah ee baarista si loo muujiyo heerka hirgelinta talooyinka baarista

Waxsoosaarka la filayo:

- Warbixinta sanadeedka oo ay ku jirto heerka hirgelinta talooyinka baarista

4

MAAMUL IYO SHAQAALE XIRFAD IYO AQOON FIICAN LEH

Tusiyaha yool gaarista:

- Tusiyeyaasha PMF ee SAI SAI-22 Maamulka Waaxda Shaqaalaha iyo SAI-23 Horumarka Xirfadaha iyo Tababbarka

HIMILADA 4.1 - XOOJINTA KARTIDA HR

Waxqabadyada muhiimka ah:

- Ka qayb qaadashada tababbarrada ku habboon Shaqaalaha, sida AFROSAI-E iyo hay'addaha kale
- Dejinta nidaamyada shaqada ee hagista hantidhowrada gobolka si loo maareeyo shaqaalaha
- Dib u eegista shaqaaleysiinta

Waxsoosaarka la filayo:

- Tirada shaqaalaha ee buuxiyey tababarka shaqada
- Dejinta nidaam cusub ee shaqo maalmeedka

HIMILADA 4.2 - HORUMARINTA XIRFADAHAA EE QORSHAHA GUUD

Waxqabadyada muhiimka ah:

- Dejinta qorshaha iyo barnaamij guud oo loogu talagalay Horumarka Xirfadeed
- Dib u eegista tilmaamaha shaqada, si loo waafajiyo qaab dhismeedka cusub ee hay'adda
- Dejinta Qorshooyinka Horumarka Xirfadeed ee shaqaalaha

Waxsoosaarka la filayo:

- Qorshe iyo barnaamij loogu talagalay Horumarka Xirfadeed
- Tilmaamaha shaqada oo la waafajiyo qaab dhismeedka cusub ee hay'adda
- Qorshooyinka Horumarka Xirfadeed ee shaqaalaha

HIMILADA 4.3 - HIRGELINTA BARNAAMIJKA HORUMARINTA XIRFADAHAA

Waxqabadyada muhiimka ah:

- Ka qaybqaadashada koorsooyinka iyo tababarrada la xulay ee horumarka xirfadaha

Waxsoosaarka la filayo:

- Tirada koorsooyinka, tababarrada iyo shaqaalaha ka qeyb qaadanaya (kuna saabsan qaybo kala duwan ee hantidhowrista) lana Tixraacayo Yoolka ku saabsan Hantidhowrista Tayada Sare leh

HIMILADA 4.4 - TAAGEERIDDA HORUMARKA XIRFADEED EE SHAQAALAHA XAFIISYADA HANTIDHOWRKA EE M/GOBOLEEDYADDA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- In lagu martiqaado Xafiisyada hantidhowrka ee M/Goboleedyadda tababaradda shaqaalaha
- Xafiisyada M/Goboleedyadda in lagu martiqaado ka qayb qaadashada dejinta qorshaha iyo barnaamijka horumarka xirfadeed
- Xafiisyada M/Goboleedyadda in lagu martiqaado ka qayb qaadashada barnaamijyada horumarka xirfadeed (tababarrada iyo koorsooyinka)

Waxsoosaarka la filayo:

- Tirada koorsooyinka la bixiyo iyo shaqaalaha uga qeyb galaya koorsooyinka iyo tababaradda M/Goboleedyadda

5

KAABAYAAL IYO AWOOD KU FILAN ICT-DA SI LOO HELO HAWLGALLO HABBOON

Tuseyaasha yool gaarista:

- Dejinta Kaabayaal Shabakadeed iyo khadad cusub
- Horumarinta siyaasadda ICT
- Tusiya PMF ee SAI SAI-21: Maamulka Maaliyada, Hantida iyo Adeegyada Taageerada

HIMILADA 5.1 - XOOJINTA AWOODA MAAMULKA ICT IYO ADEEGGA TAAGEERADA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Is waafajinta Qorshaha siyaasadda ICT-da iyo Qorshaha istiraatiijiyadeed XHG
- Dejinta xeerarka caalamiga iyo hagayaasha ICT-da oo ay kujirto mabaadii'da maamulka ICT-da iyo taageerada.
- Ka qaybqaadashada koorsooyinka iyo tababbarka shaqada lagu qaato ee ku saabsan maamulka ICT

Waxsoosaarka la filayo:

- Gudaha oo laga abuurto khibrada ICT ah
- Xafiiska oo sare loogu qaado maamulka habboon ee ICTda
- Siyaasadaha iyo xeeladaha ICT ee xafiiska oo waafaqsan siyaasadda Maamulka Elektaroonig ah

HIMILADA 5.2 - QALABKA ICT IYO NIDAAMYADA MAAMULKA MACLUUMAADKA EE HAGAAGSAN OO LOO ISTICMAALO DHAMMAAN HAWLGALLADA HAY'ADDA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Qorshaha loogu talagalay baahida loo qabo Kumbiyuutarrada iyo Nidaamyada Maamulka Macluumaadka (IMS) ee loo baahan yahay in la keeno
- Dejinta Kaabayaal Shabakadeed iyo Khadad cusub
- Soo iibinta Daabacayaasha, Koobiyeyaasha iyo Sawir geliyeyaasha kumbiyuutarka ee loo baahan yahay
- Wanaajinta nidaamka xogta lagu kaydiyo iyo soo iibinta tas-hiilaadka loo baahan yahay
- Soo iibinta Kumbiyuutarrada (PCs & laptops)
- Qiimaynta Farsamooyinka Kumbiyuutar lagu caawiyo Hantidhawrka ee ku habboon taasoo lagu eego hagayaasha cusub ee baarista lagu qabto
- Soo iibinta agabka kombuyuutarada (software) ee XHG
- Hirgelinta nidaamyada maamulka sida (dabagalka & Qiimeynta, Maamulka Waaxda Shaqaalaha, habka baarista)
- Diyaarinta Qalabka iyo xaashida shaqada
- Taageerada lataliyeyaasha IMSka iyo waafajinta baahida goobta ka jirta
- Shaqaalaha oo loo tababaro isticmaalka Kumbiyuutarrada iyo barnaamijka kumbiyuutarada cusub

Waxsoosaarka la filayo:

- Qalabka ICT oo loo isticmaalo si baahsan
- IMS oo diyaar u ah in la isticmaalo
- Shaqaalaha oo loo tababaro isticmaalka nidaamka cusub ee ICT

HIMILADA 5.3 - WANAAJINTA XARUNTA IYO QALABKA XAFIISKA HAY'ADDA

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Dib u cusboonaysiinta Dhismaha
- Ballaarinta iyo wanaajinta hantida ma guurtada ah ee XHG
- Taageeridda in XHG looga xafiisyo dhammaan M/Goboleedyadda

Waxsoosaarka la filayo:

- Hagaajinta deegaanka xafiiska
- Xafiisyada M/Goboleed oo si buuxda u hawlgala

6

BEDDELIDA QAAB SHARCIYEEDKII EE HORE EE XHGUU HADDA KU SHAQEYO

Tusiyaha yool gaarista:

- Dhaqan gelinta qaabka cusub ee sharciga
- Tusiyeyaasha PMF ee SAI-1 Madaxbannaanida iyo SAI-2 Waajibaadka Hay'adda

HIMILADA 6.1 - QAABKA SHARCIYEED EE GABAGABAYSAN OO MADAXWEYNAHA LOO DIRO SI UU U ANSIXIYO

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Hubinta sharciyada ku salaysan mabaadii' da madaxbannaanida ee ISSAI si uu si cad ugu guto waajibaadkiisa ballaaran, madaxbannaanida maaliyadeed, shaqo, maamul iyo mid hay'adeed.
- Waxyaabaha ku jira qaabka cusub ee sharciga oo lagu wargeliyo daneeyeyaasha muhiimka ah, iyadoo la marti qaadayo hantidhowrayaasha M/Goboleed ama wakiil ka socda INTOSAI.

Waxsoosaarka la filayo:

- Sharci cusub oo hanti dhowrka khuseeya
- Daneeyeyaasha qaran oo ku kalsoon ahmiyadda sharciga cusub ee hanti dhowrka iyo xafiiska hanti dhowrka ee madaxa bannaan ee Soomaaliya

HIMILADA 6.2 - HIRGELINTA QAABKA SHARCIYEED

Waxqabadyada Muhiimka ah:

- Dhammaan hay'adaha uu khuseeyo oo lagu wargeliyo sharciga cusub
- Dejinta nidaamyo lagu hirgeliyo qaabka sharciga cusub si loo gaarsiiyo meelaha mudnaanta leh

Waxsoosaarka la filayo:

- Sharciga cusub oo laga hirgeliyo meelaha muhiimka ah marka si macquul ah loogu eego muddada qorshaha istiraatiijiyadeed

5 DABAGALKA IYO QIIMAYNTA QORSHAHA

5.1 WARBIXIN SANADLEY AH OO KU SAABSAN DABAGALKA IYO HAWLFULINTA

Wagtiga lagu jiro hawsha, waxaa loo baahan yahay in horumarka la gaaray iyo casharrada la bartay si taxaddar leh loo dabagalo ama loola socdo si waqtiga habboon loo qaadi karo tallaabada wax lagu saxayo. Qorshaha istiraatiijiyada iyo hirgelinta waa in si joogto ah waxqabadyada loo qiimeeyaa howlaha socda.

Warbixinta Hawlfulinta

Warbixinada gudaha ayaa lagu samayn doonaa qiimeyn sanadle ah ee wax soosaarka la gaaray. Waxaana lagu horumarin doonaa nidaamka cusub ee Maamulka gudaha iyo Macluumaadka Hay'adda.

MACLUUMAADKA MUHIIMKA AH EE KU SAABSAN HORUMARKA AYAA LAGU MUUJIN DOONAA WARBIXINADA HAWLFULINTA SANADLAHA AH EE HAY'ADDA.

5.2 QIIMAYN DHAMMAADKA MUDDADA

Marka ay dhammaato muddada qorshaha istiraatiijiyeed, waxaa la qaban doonaa qiimaynta PMF ee SAI oo ay qabtaan koox iskugu jirta wakiillada XHG iyo khabaro PMF ee SAI ee dibadda. Waxaa la tixgelin doonaa in qabashadeeda lagu xiro dib u eegidda Tayo hubinta ee AFROSAI-E.





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA HANTI
DHOWRAHA GUUD

WWW.OAG.GOV.SO